

La talin iyo xiriir

Talada ugu horaysa waxaad ka helaysa shaqaalaha xanaanada. Hadii wax shaki ahi kaa galo xanuunka haya ilmahaaga, waxaad la xiriiri kartaa dhakhtarkiina.

Shaqaalaha xanaanada waxaa la taliya dhakhaatiirta caruurta iyo dhalinyarada ee komunaha Aarhus, isla markaana u sheega wixii ay ka samayn lahayeen xanuunada faafa, waana inay talooyinkoodu waafaqsanadan sharciyada u yaal wasaarada caafimaadka.

Cafimaad qab ama Jiro?



**Goormaad cunugaaga guriga
ku haysan kartaa?**

*Qoraalkan waxaa soo saaray:
Caafimaadka iyo dhaqaalaynta qaybta waxbarashada
Caruurta iyo dhalinyarada ee komunaha Aarhus*

www.aarhus.dk/st
rev. juni 2011

Goormuu cunugu guriga joogayaa?

Caruurta xanuunsan gurigaa lagu hayaa. Cunugu wuxuu u baahanyahay xanaanayntiina, isla markaana wuxuu qaadiinka karaa xanuunka caruurta kale iyo waliba shaqaalaha Xanaanada.

Xanaanooyinka intooda badani waxay jecelyihiin in subixii hadii uu cunugaagu jiranyahay aad telefoon ku soo sheegtid. Waydii Xanaanda sida ay u maamulaan markuu ilmuhu xanuunsanyahay iyo markuu cafimaadaba.

Hadii cunugaagu ku xanuunsodo Xanaanada?

Shaqaalaha Xanaanada ayaa idiin la soo xiriiraya, hadii cunugiinu xanuunsado inta uu xanaanada joogo. Waxaa waajib idinku ah in aad markaa cunuga ka kaxaysaan Xanaanada.

Goormuu cunugu Xanaanda ku soo laaban karaa?

Sharciga guud waxa weeye in aanay caruur iyo shaqaale xanuunsan toona imaan karin Xanaanada iyo in cunug qaba xanuun faafaya uusan Xanaanada imaan karin inta xanuunkiisu fidayo. Cunugu waa in uu caafimaad qabaa, isla markaas ka qaybqaadan karayaa, waxyaalaha caruurta sameeyaan inta ay Xanaanada joogaan, isaga oo aan ubaahan xanaanayn ama taxader dheeraad ah.

Caafimaad qab ama jiro?

Marka qiimayn lagu samaynayo, in uu ilmuhu caafimaad qabo ama xanuunsan yahay, waxaa muhiim ah in la qiimeeyo xaalada ilmaha.

Ilmo aysan xaaladiisu caadi ahayn waxa uu noqon karaa:

- In cunugu dhegaha si fiican uga maqlayn, inuu xanaaq badan yahay, inaanu deganayn iyo inuu ooyayo
- in uusan cunugu rabin in uu ciyaaro sidii hore, lakiin uu jecelyahay inuu meel jiifo ama iska fariisto
- In ilmuhu aanu doonayn inuu wax u cuno ama u cabo sidii caadiga u ahayd
- In ilmuhu aanu doonayn inuu la ciyaaro caruurta kale

Xanuunada kale calaamadhoodu waxay noqon karaan:

- Shuban iyo/ama matag
- In duuf badan ilmaha ka socdo, qufac ama indhaxanuun uu leeyahay
- Qandho ama xumad

Cudurada faafa ,lakiin ilmaha xaaladiisa caadiga ah aan saamayn ku yeelanayn:

- Waxaa jira cuduro badan oo faafa. Si loo joojiyo fiditaanka xanuunadaas, waxa dhici karta in la codsado in ilmaha guriga lagu hayo, inkasta oo ay xanuun laga arkayaa uusan jirin, tusaale ahaan nabaro ilmaha ka soo baxa oo kale.